# Waxbarashada Xanaaneynta caafimaadka.

Madoonaysaa in aad ka shaqeysid sida dadka aad u caawinlaheed, ama aad gargaar aad u siin laheyd?
Madoonaysaa in aad shaqeysid adigoo wax barashada dugsiga sare ku jira?
Madoonaysaa in aad markaad dhameysatid waxbarshadaada aad si toos ah aad u raadsatid shaqo, islamarkaana aad haysatid fursad aad wax barashadaada ku sii wadan kartid?
Madoonaysaa in aad heshid waxbarasho aad marwalba aad shaqo aad ku helikartid?
Madoonaysaa in aad la shaqeysid koox, koox daas oo lashaqeendoona dadkale?
Haddaba waxbarashadan garkaark caafimaadka, waa mid adiga ku gu haboon.

Waxbarashadan gargaarka caafimaadka waxaad marka hore aad baran doontaa asaaska aqooneed hooseed ee gargaarka iyo xanaaneynta.Waxaad barandoontaa sida uu jidhka bini aadanku uu u sameeysanyahay, iyo sida uu u shaqeeyo.Waxaad kaloo aad aqoonteeda aad yeelandoonta sida marka aad goob shaqo ah aad ka shaqeynaysid aad u xalinlaheyd haddii ay ku soo foodsaarto arimo culus.

Waxa ugu baladhan waxa ay tahay mustaqbalkaaga xaga shaqada, kaas oo ah habka aad ula dhaqantid, unana fahantid dadka qaba baahiyo kaladuwan,dhaqano kaladuwan iyo diimo kaladuwan leh. Waxaa lagayaabaa in aad lakulantid dadbadan oo u bahan caawimaad aad u badan, iyo gargaar aad u badan, oo dadkaasi iyagu aan keligood aan isku filneyn. Waxbarashada xananeynta caafimaadka waxaad kaloo aad baran doon taa aqoonta cilmi nafsiga, sabatuna aytahay sida uu bini-aadanku naftiisu aynoqoto marka ay geeri ay ku timado ama cudur iwm.

**In aad shaqeysid ama aad waxbarashadaada ad sii wadatid.**

Haddii aad dooratid barshada xananeynta caafimadka, shaqo toos ah waad raadsan kartaa marka aad dugsiga sare aad ka baxdid. Hadiikale ee aad doontid waad si wadan kartaa wax barashadaada ilaa iyo heer jaamacadeed. Waa muhiim in aad dooratid casharo dugsisare ah oo aad ku gelikartid jaamacada haddii aad dooneysid in aad jaamacada aad dhigatid. Haddii aad iminka aad ogtahay waxa aad dooneysid in aad baratid heer jaamacadeed waxa aad su aali karaysa masuulka u qaabilsan iskuulka waxbarashada(studie-och yrkesvägledare)casharada aad u baahantahay in aad dhigatid iyo kuwa u baahan dhameystiro.

Waxbarashada xanaaneyta caafimaadku waa mid leh aqoon hooseed caafimaad,kaas oo kuu sahlidoona haddii aad dooneysid in aad baratid sida, xanaaneynata iyo gargaarka dhaawac deg-deg ah, cusbitaalada, cusbitaalada daaweynta maskaxda,(dhimirka), dhakhtarka caruurta, gargaarka lagu darjeelo dadka aan kaligood aan wax qabsan kareynin. Dadka dada ah ee degen meelo gaar ah, iyo kuwa curyaamiinta ah. Waxayna ay taha horu dhac aqoon cafimadee iyo wixii lahalmala.

**Shaqooyinka aad heli kareysid**

Marka aad dhameysatid waxbarshada xanaaneenta caafimaadka, waxa aad raadsankartaa oo aad ka shaqeynkartaa sida kal-kaaliye hoosad caafimaad, xanaaneyn iyo daryeelid caafimadeed, kalkaliye.Waxaad kaloo aad sii noqonkartaa oo aad waxbarashadaada aad barankartaa sidii aad u noqon laheed kal-kaaliye dhaqtaradeed buuxa, ama wax barashooyinkale oo laxidhiidha caafimaadka.

**Waxbarashadan waxa ay ka koobantahay.**

Waxbarashada xanaaneynta caafimaadku waxa ay ka koobantahay casharo. Casharo qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganayasa dugsiga sare in ay qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa waxbarashada xananeyna caafimaadka oo kaliya. Waxaa intas sooraaca in ay jiran casharo kale oo aad adigu gooni aad u doorankartid.

Qorshahan loogu talagalay waxbarashadan ma aha mid ku aadan dhamaan waxbarashada caafimadka oo dhan, laakinse waxaad ka doorankartaa mid kamid ah wax barashadaas caafimaadeed, oo aad adigu gaar a haan aad xiiseynaysid, xiiseeneysidna in aad baratid. Waxaad tusalo ahaan ad barankartaa barashada caafimaadka, xanaanada dadka dada ah ama waayeelka ah, xanaaneynta iyo gar-gaarka dadka maskada ka xanuunsan ama qaba xanuunka maskaxda(dhimirka), caruurta yar-yar iyo dhanlinyarada, cusbitalka deg-dega ah, dadka curyaamiinta ah.

Waxaa jira in dugsiyo sare ey leyihiin takhasuso ugaar ah, oo si gooni ah loo qorsheeyey. Haddaba waxaad taas aad kala xidhidhikartaa(studie-och yrkesvägledare) oo ah qofka u qaabilsan iskoolka tacaliinta dugsiyada ama iskuulada, waana haddii aad dooneysid in aad wax ka ogaatid waxbarashada lagu barto laguna dhigto iskuulka aad dooneysid in aad wax ka dhigatid.

## Xidhiika suuqa shaqada

Marka aad ku jirtid waxbarashadan gargaarka caafimaadka waxa aad xidhiidh la lahaan doontaa suuqa shaqada,Waxaad kaloo aad heysataa ugu yaraan ilaa iyo 15 isbuuc oo dababar xirfadeed iyo mid aqoon kororsi ah (APU) Waana habka ugu wanaagsan ee aad dad ku barankartid, xidhiina aad ku yeelan kartid.xidhiidh kaas oo aad markale aad kaga faa ideeysankartid haddii aad istiraahdid shaqo raadso mustaqbalka.Haddii aad dooneysid in aad tababar xirfadeed aad kusameysid dibada meel aan aheen Swiidhen, way surtogal noqon kartaa.

## Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Waxaa suurtogal ah inaad sifudud aad u heli doontid shaqo toos ah kadib marka aad dhameysid waxbarashada dugsigasare ee gargaarka caafimaadka.

Sanadihii u danbeeyey waxaa jirey shaqooyin aad ubadan, shaqooyinkaas oo lagu qiiyaasay in ay lamid yihiin tiro ahaan, tirada ardeyda ee qalinjabisey in lamid ah. In shaqo helitaanku ay kugu adkaato ama ay kuu fududaato, waxa ay ku xidhantahay haddii aad diyaar aad u tahay in aad guurtid ama aad safaro aad u tagtid meelo kale oo kala duwan.

Degmooyinka qaarkood wey kala lacagbadanyihiin, oo markaas degmooyin ayaa dhaqaaluhu u saamaxaaya in ay dadfarabadan ay shaqaaleysiiyaan, o oka shaqeeya sida gargaarka caafimaadka.Mustaqbalka waxa loobaahanyaha dad farabadan o oka shaqeeya gargaarka caafimaadka.Sababta keeneysana in dadbadan loobaahnaandoono waxa ay tahay,dad farabadan oo kunool iswiidhan ayaa waayeelo noqondoona. Sidaas daraadeed baahi ween ayaa looqabidoonaa dad shaqeeya.

Haddii aad wax barashadaadana aad siiwadatid markaa fursadahaaga shaqo helidu wey sii wanaagsanaan doontaa.